

You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. Fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng chữ lớn, bằng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。 [Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]



Awarded for excellence



INVESTOR IN PEOPLE



North River Alliance

Gateway Housing Association

409-413 Mile End Road, London, E3 4PB

Residents: 020 8709 4300

General enquiries: 020 8909 4409

Fax: 020 8709 4400

Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk

www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.

Waxaad filii karto Ballanqaadka adeegga ee Gateway



What you can expect
Gateway's service pledge
– Somali translation



Maadaama aanu nahay hantiilaha gurigaa, waxaanu:

- bixin doonaa adeeg uu qof kastaaba heli karo;
- sii wadi doonaa inaanu gurigaaga horumarino iyo meelaha ku xeeran;
- si waxtar leh u maamuli doonaa ururkayaga si aanu kirada uga dhigno ta ugu jaban ee caqligalka ah una bixino adeegga ugu qiimaha badan ee aanu kari karno, siday dhigayaan shuruucda dawladdu;
- ku siin doonaa macluumaad ku saabsan adeegyada istaytyada ee aad hesho, ee ay ka midka yihiin nadiifinta iyo hagaajinta beerta;
- taageeri doonaa mashaariicda horumarinta beesha;
- kugu dhiirin doonaa inaad door firfircoon ka qaadata shaqada aanu qabano;
- ku siin doonaa macluumaad ku saabsan sidaanu kiradaada u dejino, iyo sidaanu adeeg kuu siino; iyo
- kuu soo diri doonaa nuqul ah warbixintayada dadka deggan ee sannadka.

Waxa keliya oo aanu joojin doonaa deganaanshahaaga haddii aad ilaalin weydo shuruudaha deganaanshahaaga. Waxa keliya oo aanu guriga kaa saari doonaa haddii aanu awood ka haysano maxkamad.

Xuquuqahaaga

Maadaama aad tahay qof deggan, waxaad xaq u leedahay inaad;

- gurigaaga deganaato (waxa loo yaqaano deganaansho sugan) illaa iyo intaan ilaalinayso shuruudaha heshiiskaaga deganaanshaha;
- si nabad ah ugu noolaatid gurigaaga;
- qof guriga soo seexisid haddii aad marka hore noo soo sheegto;
- gurigaaga uga tagtid ninkaaga/xaaskaaga ama qof qoyskaaga ka mid ah haddii aad geeriyooto (qofka aad gurigaaga uga tegeysaa waa inuu gurigaaga kugul noolaa ugu yaraan 12 bilood);
- eegtid faylkaaga ama wixii ah rikoodho kombuyuutar ee aanu adiga kaa hayno;
- isticmaasho nidaamkayaga dacwadaha haddii aanad adeegayaga ku qanacsanayn;
- hesho magdhow duruufo gaar ah uun sida lagu sharxay siyaasadayada magdhowga;
- naga fisho inaanu macluumaadka aanu kaa hayno adiga iyo qoyskaagaba aanu ka dhigno qarsoodi, adigoo na siiya ogolaansho, ama ay na saarantahay masuuliyad dadweynaha ah oo ah inaanu cid la wadaagno;

- guriga ka bedelato qof kale oo deggan guryaha Gateway, dawladda hoose guryaheeda qof deggan ama qof kale oo deggan guryaha hantiileyaasha kale ee diiwaangashan, haddii adiga iyo iyaguba buuxisaan shuruudo gaar ah;
- hesho warbixinaha kirada saddexdii biloodba mar; iyo
- in lagula socodsiiyo shaqadayada iyadoo lagu soo qorayo warside jooqto ah.

Waxa kale oo aad leedahay xuquuqo badan oo sharci maadaama aad tahay qof deggan, kuwaas oo lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha, xeerka dadka deggan ee Shirkadda Guryaha iyo buuggaaga dadka deggan.

Haddii aad tahay qof guriga iibsaday waxaanu:

- qabsan doonaa masuuliyadahayaga naga kaa saaran siduu dhigayo iibkaagu;
- kuula dhaqmi doonaa si khibradi ku dheehantahay, haddii aad gurigaaga iibinayso ama aad sheerar badan oo gurigaaga ah aad iibsanaysoba;
- kuu soo diri doonaa warbixinaha kirada, warbixinta lacagta sanduuqa dib u samaynta (lacagta loo dhigo dib u samaynta

dhismaha ee mustaqbalka) iyo macluumaad ku saabsan lacagahaaga adeegga, sannad walba; iyo

- kuu soo sheegi doonaa haddii aanu wax isbedel ah ku samayno siyaasadayada iyo nidaamadayada.

Macluumaadka anaga nagu saabsan

Waanu sii wadi doonaa inaanu:

- kuu soo diro ugu yaraan afar warside sannad walbaa, oo ka koobnaan doona macluumaad ku saabsan shaqadayada iyo waxqabadkayaga;
- ku siino macluumaad iyo tababar ku saabsan sida aad shaqadayada uga qayb qaadan karto;
- kugu dhiirino inaad aasaasto ururka dadka deggan kuna siino taageero jooqto ah;
- ku siino ogeysiis badan haddii aanu u baahano inaanu samayno shaqo dib u samayn ah oo weyn iyo horumarino saamaynaya gurigaaga, kulana tashano kaana qaybgelino inta lagu jiro heer kasta oo shaqada ah;
- si jooqto ah kuu weydiino aragtiyahaaga ku saabsan tayada iyo heerka adeegyadayada, kuna siino warcelin; iyo
- ku siino waraaqo macluumaad oo adeegyadayada, haddii aad codsato.